

*Dugsiga Dagmada Salt Lake City*  
*Barnaamijka Waxbarashada Fidsan*

**MAXUU YAHAY  
BARNAAMIJKA  
WAXBARASHADA  
FIDSAN?**

Barnaamijka Waxbarashada Fidsan (Extended Learning Program) (ELP) wuxuu ardayda darajooyinka K-8 ee muujiya awoodda waxbarashada sare iyo raadinta sababta siiyaa fursadaha waxbarashada. Ardayda dugsiga hoose ee u baahan barnaamijkaan waxay caadi ahaan ku shaqeyaan heer aad uga sareeyo da'dooda xagga akhriska iyo xisaabta. Ardayda dugsiga sare ee laga yaabo in ay u baahan yahiiin barnaamijkaan, caadi ahaan, waa kuwa xaqa u yeesha sharafta ama fasalada sare. Dhamaan ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay soo dalbadaan iyadoo aan laa fiirin jinsiyadda, isirka, hiddaha, ama dakhliga qoyska.

**BARNAAMIJKA WAXBARASHADA  
FIDSAN MAY YAHAY MID KU  
HABBOON CUNUGEYGA?**

Waa in aad ku fakartid in aad cunugaada geysid barnaamijkaan haddii dhowr ka mid ah ama inta badan qodobada soo socda sifeyaan cunugaada:

- ✚ Wuxuu muujiyaa awoodda raadinta sababta.
- ✚ Wuxuu fikradaha cusub ku fahmaa dadaal yar.
- ✚ Wuxuu niyad u muujiyaa waxa uu daneeyo.
- ✚ Wuxuu iskudayaa in uu mar kaasta sax ahaado.
- ✚ Wuxuu inta badan aad u dhalliilaa naftiisa
- ✚ Wuxuu kaftan ku arkaa xaalado kala duwan.
- ✚ Wuxuu adeegsadaa erayo badan marka loo fiiriyo da'da.
- ✚ Wuxuu aad u raadiyaa in uu wax ogaado.
- ✚ Wuxuu ku horumaraa waxa adag.
- ✚ Wuxuu muujiyaa dareen xoggan.
- ✚ Wuxuu muujiaa awood uu ku soo jeediyo fikrado.



Extended Learning  
Program 440 E 100 S, SLC,  
UT 84111

**DUGSIGA DAGMADA  
SALT LAKE CITY**

**BARNAAMIJKA  
WAXBARASHADA  
FIDSAN**

*Adeegyada Aqoonta Khaaska  
(Specialized Academic Services) ee  
loogu talagalay Ardayda  
Kartida/Hibbada Sare*



# BARNAAMIJKA WAXBARASHADA FIDSAAN

Dugsiga Dagamada Salt Lake City waxay ardayda awoodda sare iyo raadiya asbaabta siisaa dhowr fursado oo la xariira barnaamijka.

## ADEEYADA DUGSIGA HOOSE ELP

**Barnaamijyada Ka-Bixidda Xaafadda** waxay ka shaqeyaan dugsiyada hoose ee ku yaala dagmada iyo waxay bixiyaan ilaa saddax saac waxbarashada fidsan lana siiyo ardayda tilmaaman. Ardaydaan waxay caadi ahaan ku jiraan darajooyinka 4 - 6, halka macalimiinta ka siiyaan tababarka Heerarka Maadooyinka Muhiimka Utah (Utah Core Standards).

**Barnaamijyada Takhasuska Maalinta Buuxda (Magnet Full Day Programs)** waxay ku yaalaan dugsiyada hoose Emerson, Hawthorne, iyo Whittier. Ardayda xaqa u yeelata takhasuska ELP waxay muujiyeen in ay u baahan yahiiin barnaamijka waxbarashada xawliga ku socda una baahan qoto dheeri, adkaan, iyo nidaam. Ardayda K-3 iyo qoysaskooda waa in ay ku noolaadaan gudaha xuduudda Dugsiga Dagmada Salt Lake City. Barnaamijka Takhasuska Magnet ELP International Pathways Program, ee ku yaal Dugsiga Hoose Emerson, waa barnaamijka barashada Ingiriisiga iyo Isbanishka, kaasoo ardayda xaqa u yeelata siiya fursad ay ku bartaan kuna hadlaan labo luqad.

## ADEEGYADA DUGSIGA DHEXE ELP:

**Barnaamijyada Dugsiga Dhexe ee Xaafadda** waxay ka shaqeyaan shan dugsi dhexe oo ku yaal xaafadda dagmada. Ardayda la tilmaamay waxay tagaan hal ilaa afar fasal ELP halkii maalin. Xaafadda ELP waxaa ka mid ah fasalada sida fanka luqadda, sayniska, cilmiga bulshada, ama xisaabta. Fasaladaan, ardayda darajada todobaad iyo sideedaad waxay ku shaqeyaan xawli iyo maado adag oo qoto dheer.

## **Barnaamijyada Dugsiga Dhexe Takhasuska Waqtiga Buuxa (Magnet Full Time Middle School Programs)**

waxay ku yaalaan Clayton, Glendale, Hillside, iyo West High School, iyo waxay ardayda darajada todobaad iyo sideedaada siyaan barnaamij waxbarasho sare oo ku socda xawli. Ardayda la tilmaamay waxay muujiyeen in ay u baahan yahiiin barnaamij waxbarasho aad u habbeysan.

*Ardayda ku wanaagsan  
waxbarashada ama muujiya karti  
ay ku shaqeyaan heerarka sare  
marka la barbar dhigo kuwo kale  
oo la siman xagga da'da, waayo  
aragnimada, ama xaaladda, waxay  
u baahan karaan tababar gaar ah  
iyo manhaj ay kula kulmaan  
baahidooda waxbarashada.*

## ADEEGYADA DUGSIGA SARE

Fasalada **Meeleynta Sare** waxaa laga bixiyaa dugsiyada sare East, Highland, iyo West. Raacidda manhajka Meeleynta Sare (Advanced Placement) (AP) waxay ardayda u ogolaataa fursad ay ku shaqeystaan saacadaha kulliyadda marka ay gudbaan imtixaanaadka AP.

## **Barnaamijyada Shahaadada Caalamiga Baccalaureate**

waxay ku yaalaan dugsiyada sare Highland iyo West. International Baccalaureate (IB) waa barnaamij waxbarasho guud oo ka dhexeeyo maadooyin ku dhisan falsafad iyo dhaqan gal. Waayo aragnimadaan badan ee ku saabsan hiddaha waxay xoojisaa xirfadaha baarista iyo fikradda iyo fahamka kore. Manhajka IB wuxuu fududeyaa koriimo, kaalmada la siiyo shakhsiyadka qiimeeya nolol midaysan oo ka baxsan darbiyada iyo sannooyinka fasalka, iyo sidoo kale in ka baxsan xuduuda joqraafiyada iyo siyaasadda, iyo kala duwanaanta hiddaha. Ardayda uma baahna in ay ku noolaadaan Dugsiga Dagmada Salt Lake City si ay u tagaan.

## SIDEE AYAAN CUNUGEYGA UGU WAREEJIYAA ELP?

**Macluumaadka** ku saabsan ELP da dugsiga hoose xaafadda cunugaada, fadlan la xariir macalinka cunugaada ama macalinka ELP ee dugsigaada. Haddii aad xiiso u qabtid in cunugaada la qiimeeyo si loogu meeleeeyo dugsiga takhasuska, fadlan la xariir xafiiska ELP, telefoonka 801-578-8573.